

Oggolaanshaha#: \_\_\_\_\_ BCCHP#: \_\_\_\_\_

**Breast, Cervical and Colon Health Program Consent  
(Barnaamijka Bixinta Oggolaanshaha Caafimaadka Naasaha, Ilmo galeenka iyo Xiidmaha)**

**QEEXIDA BARNAAMIJKA**

**Breast, Cervical and Colon Health Program (BCCHP, Barnaamijka Caafimaadka Naasaha, Ilmo galeenka iyo Xiidmaha)** waa dadaal waxqabad oo u dhaxeeya daryeel bixiyaasha caafimaadka, Washington State Department of Health (DOH, Waaxda Caafimaadka ee Gobalka Washington), iyo Centers for Disease Control and Prevention (CDC, Xarunta xakameynta iyo Ka hortaga Cudurada) si ay gacan oga geystaan baaritaanka kansarka naasaha iyo ilmo galeenka. Ujeedada loo sameeynaayo baaritaanka waa in la ogaado kansarka inta uu yar yahay si loo daaweeyo loogana hortago. Baaritaanka kansarka naasaha waxaa kamid ah tijaamada naasaha iyo raajitada naasaha ee loo yaqaan mammogram. Baaritaanka kansarka ilmo galeenka waxaa kamid ah baaritaanka miskaha iyo in muunad laga qaado unugyada ilmo galeenka (furitaanka makaanka/uur kujirta) oo loo yaqaan baaritaanka HPV iyo Pap.

**OGGOLAANSHAHA BIXINTA MACLUUMAADKA**

Waxaan oggolaansho siinayaa mid kasta iyo dhammaan daryeel bixiyaasha caafimaadka, unugta caafimaadka, isbitaalada, qorshaha caymisyada caafimaadka, iyo BCCHP si ay isku waydaarsadaan macluumaadkayga daryeelka caafimaadka, baaritaanada makaanka, naasaha, mammograms iyo wax kasta oo la xariira daryeelkayga caafimaadka ee aan ka helo BCCHP. Waxaan fahmayaa foomkaan oggolaanshaha inuu dhacaayo 12 billood kadib marka aan saxiixo foomkaan. Waa inaan iska qoro mar labaad 12 billood kadib si aan usii wado adeegyada.

**Macluumaad kasta oo loo gudbiyo BCCHP waxay sii ahaanayaan kuwo qarsoon.** Macluumaadka waxaa heli kara aniga, shaqaalaha qaabilsan adeegyada BCCHP, Laamaha Daryeelka Caafimaadka (ee Barnaamijka Daaweynta Kansarka Makaanka iyo Naasaha (BCCTP) haddii uu quseeyo), iyo Waaxda caafimaadka (ee bixisa ilaha maalgelinta BCCHP). Macluumaadka waxaa loogu talagalay in loo adeegsado ujeedooyinka BCCHP ee kor lagu qeexay. Warbixinada la daabacay oo ah natiijooyinka ay diyaarisay BCCHP majiro doono macaamiil laga aqoonsan doono magaciisa.

Waxaan fahansanahay in ka qaybqaadashada barnaamijkaan yahay ikhtiyaari aana iskaga bixi karo BCCHP da iyo sidoo kale inaan ka noqon karo oggolaanshaha bixinta macluumaadka waqti kasta. Waxaan fahan sanahay hadii la iga helo kansarka naasaha iyo/ama makaanka, inaan u qalmi karo helida daaweynta lagu bixiyo Apple Health BCCTP. Shaqaalaha BCCHP ayaa markaas iga caawinaaya isdiiwaangelinta. Maadaama ay qayb ka tahay adeegyada Maareynta Kiiska ee aan helo, waxaan fahan sanahay in la iiga baahan karo bixinta oggolaanshaha daaweyntayda iyo bixinta macluumaadka kale ee muhiimka ah.

**Haddii aan bixivo macluumaad aan sax ahayn oo la xariira ka go'aan gaarista uqalmitaankavga, waxaan fahan sanahay inaan masuul ka ahay eedaas.**

\_\_\_\_\_  
Halkaan saxiix adoo qoraaya Taariikhda  
magacaaga

\_\_\_\_\_  
Marqaatiga: Rugta Caafimaadka Taariikhda

\_\_\_\_\_  
Halkaan ku qor magacaaga

\_\_\_\_\_  
Turjumaanka (haddii la Taariikhda  
isticmaalay)